

# SIDEEN U DALBAN KARAA "KU BIIRISTA FAYLKA QOYSKAYGA" ONLINE?

Dukumeentigu waa inuu dadka ka caawiyo inay fahmaan nidaamka magangalyada ee Koonfur Afrika. Fadlan la soco in tani ay tahay hage kaliya. Maaha talo sharci. Macluumaadkan ayaa laga yaabaa inuu isbedelo. Booqo [www.scalabrini.org.za/information-about-asylum-in-south-africa](http://www.scalabrini.org.za/information-about-asylum-in-south-africa) si aad u hesho xog cusub. Xarunta Scalabrini ee Cape Town mas'uul kama noqon doonto tallaabada la qaaday ee ku saleysan dukumeentigan.

TALAABADA 1AAD



**HUBI IN AAD LEEDAHAY  
AKOONTIGA IIMAYLKA**

TALAABADA 2AAD



**E-MAIL KU DIR XAFIISKA SOO  
DHAWEYNTA  
QAXOOTIGA EE SAXDA AH.**

TALAABADA 4AAD



**KA QAYBGAL BALAMAHAGA EE  
XAFIISKA QAXOOTIGA,  
SHAKHSI AHAN**

TALAABADA 3AAD



**SUG JAWAAB.WARQAD  
BAA LAGUUSOO DIRI  
DOONAA.**

**WAX BADAN KA OGOW BOGGA XIGA**





**TALAABADA 1AAD**

**HUBI INAAD HAYSATO CIWAANKA EMAIL KAAGA**

Haddii aanad lahayn ciwaan iimayl kuu gaar ah, waa in aad samaysato iimayl gaarka ah. Ha u isticmaalin ciwaanka iimaylka guud ee kafateeriyada interneedka ama ciwaanka iimaylka ee lagula wadaago. Ha ku isticmaalin ciwaanka iimaylka guud ee kafateeriyada intarneetka ama ciwaanka iimaylka ay cidkale kula wadaagto. Waa inuu noqdaa ciwaanka iimaylka gaarka ah ee adiga kuu gaar ah. Waa inaad mustaqbalka geli kartaa akoonkan iimaylka, markaa iska hubi inaad xasuusato tafaasiishaada gelida iyo eraygaaga sirta ah (password). Qaar badan oo ka mid ah adeegyada Arrimaha Gudaha ayaa hadda online ah. Waxaan kugula talineynaa isticmaal isku mid ah Koontada iimaylka gaarka ah markaad la falgasho Arrimaha Gudaha.

**TALAABADA 2AAD**

**U DIR EMAYL XAFIISKA SOO DHAWEYNTA QAXOOTIGA EE SAXDA AH**



Si aad u codsato "ku biirista faylka qoyskayga," waxaad ku bilaabaysaa adiga oo soo diraya e-mail. Si kastaba ha ahaatee, hadhow habsocodka, waa inaad, shakhsi ahaan, aad u tagtaa Xafiiska Soo dhawaynta Qaxootiga si aad ballan qof ahaan u qabsato. Hubi inaad iimaylkaaga u soo dirto Xafiiska qaabilaadda Qaxootiga meesha aad ka heshay kordhintaadii/goobtii aad kacusboonesiisatay sharciga ugu dambaysay ee magangalyadaada ama dukumeenti qaxootinimo. Liiska hoose ka dooro ciwaanka emailka saxda ah:

<b>XAFIISKA SOO DHAWAYNTA QAXOOTIGA CAPE TOWN</b>	<a href="mailto:inquiries.ctrro@dha.gov.za">inquiries.ctrro@dha.gov.za</a>
<b>XAFIISKA SOO DHAWAYNTA QAXOOTIGA PRETORIA (DESMOND TUTU)</b>	<a href="mailto:inquiries.dtrro@dha.gov.za">inquiries.dtrro@dha.gov.za</a>
<b>XAFIISKA SOO DHAWAYNTA QAXOOTIGA MUSINA</b>	<a href="mailto:inquiries.musinarro@dha.gov.za">inquiries.musinarro@dha.gov.za</a>
<b>XAFIISKA SOO DHAWAYNTA QAXOOTIGA DURBAN</b>	<a href="mailto:inquiries.durbanrro@dha.gov.za">inquiries.durbanrro@dha.gov.za</a>
<b>XAFIISKA SOO DHAWAYNTA QAXOOTIGA QQEBERHA (HOREY LOO YAQAANAY PORT ELIZABETH)</b>	<a href="mailto:inquiries.perro@dha.gov.za">inquiries.perro@dha.gov.za</a>

E-mailkaaga Waaxda Arrimaha Gudaha, waxaad ku qori kartaa mawduuca: "ku biirista faylka qoyskayga" ka dibna magacaaga iyo lambarkaaga ogolaanshaha (lambarka faylka). E-mailka, waxaad ku qori kartaa, "Mudane ama marwo, waxaan si naxariis leh uga codsanayaa qoyskayga inay ku soo biiraan ninkayga / xaaskayga / carruurta / waalidkayga waayeelka ah." Ku dir magacaaga oo buuxa, lambarka oggolaanshaha, iyo xidhiidhka taleefanka gacanta e-mailka sidoo kale. ka dibna u dir emailka

**TALAABADA 3AAD**

**SUG WARQAD BALLAN AH + TAG BALLANTA**



Ka dib markaad iimayl u dirto Waaxda Arrimaha Gudaha, waxay dib kuugu soo diri doonan warqad ballan ah. Tan waa lagu lifaaqi doonaa iimaylka. Waxay tilmaami doontaa goorta ay tahay inaad aado Xafiiska soo dhawaynta Qaxootiga

- iska hubi inaad aado balantaada xafiiska qaabilaadda qaxootiga tagto
- Keen dadka aad rabto inay ku biiraan faylkaaga. Tani waxay noqon kartaa ninkaaga ama xaaskaaga, waalidiinta waayeelka ah, ama carruurtaada.
- Soo qaado dukumeenti kasta oo muhiim ah sida waraaqaha guurka, waraaqaha dhalashada, iyo dukumeenti kasta oo kale oo muhiim ah oo caddaynaya in dadkani ay yihiin xubnaha qoyskaaga

**XUSUUSNOW, NIDAAMKAN OO DHAN WAA LACAG LA'AAN FREE OF CHARGE.**

